

# Wacyi gelinta Naaska Raadinta isbeddelo



Breast Screening

# Wacyi gelinta naaska: raadinta isbeddelo

Kansarka naasku waa nooca aad ka loo yaqaan ee haweenka Waqooyiga Ireland 1-12 ah haween ah ayaa qaada kansarka ka hor da'da 75.

Kansarka naaska wuxu qofka ku dhici karaa da' kasta. Si kastaba, halista qaadistu waxay la sii korodhaa da'da.\_Kansarka naasku wuxu u badanyahay haweenka jira ama ka wayn 50. Haddii waqtii hore la ogaado cudurka, dawayntiisu way fududaanaysaa.

## **Waa maxay wacyi gelinta kansarka naasku?**

Wacyi gelinta naaska macnaheedu waa ogaanshaha naaskaaga iyo ogsoonaanta waxa uu yahay isbeddelka caaddiga ku ah.

## **Sideen u noqon karaa qof ogsoon naaska?**

Waxaad noqon kartaa qof ka warqaba naasahaaga adoo eegaya, oo dareemaya, iyaga hab aad kuugu fiican, tusaale xamaamka gudahiisa, tuushka, ama lebisashada, samaynta tan caadi ahaan, tusaale mar bishii.

Xirfadyqaanada caafimaad in dheeraada kuma taliyaan hab la dejiyay oo lagu baadho naasahaaga. Waa muhiim in aad dareento dhammaan qaybaha naasahaaga, oo ay ku jirto caaradda naasahaaga iyo gudaha iyo hareeraha kilin-kiladaada.

## **Naaska Caadiga ah**

Ilaa aad gaadho joogsiga dhiiga caadada, naasahaagu waxay dareemi karaan isbeddel maalmaha ka hor wakhtiga dhiiga caadada marka xubnaha caanaha-sameeyaa ay noqdaan kuwa firfircooni. Wakhtiga naasaha haweenka qaar waxa dhici karta in ay waynaadaan oo dareemaan soo kuusni iyo jileec, gaar ahaan meel udhow kilin-kiladooda,

Ka dib jarista qayb makaanka ah, naasahu caaddi ahaan waxay muujiyaan farqiyoo kala gadisan bil kasta ilaa wakhtiga dhiiga caadadu ay joogsadaan.



Daawaynta beddelka hormoonka (HRT) waxay ka dhigaan naasaha kuwa sii adkaaga oo sii yara jilca.

Ka dib joogsiga dhiiga caadada, hawsha xubinta caano-soo saarista way joogsataa. Waxaa badalmo naaska inta uu le'egyahay, wuu sii jilcaa, sii debcaa aadna uma kuusnaado.

# Isbeddeladee ayaan raadiyaa oo dareemaa?

## Muuqaalka


Isbeddelka inta uu leegyahay ama qaabka naasaha mid uun, gaar ahaan kuwa ay sababto dhaqaaqa gacantu; wax laalaabad ah, duubis harag ama casaansho maqaarka ah; ama xididada u soo baxa si aan caadi ahayn.



Illustrations courtesy of Breast Cancer Care



## Dareenada

Xanuun ama raaxo la'aan qayb ka mid ah naaska ama kilinkiladaada, gaar ahaan hadduu cusubyahay xanuunkan marwalbana aad dareentid.






## Barar kuusan

Wax kuusni ah ama  
in qaradu adkaato  
mid uun naasaha taas  
oo la dareemo in ay  
ka duwantahay  
naaska kale; wax  
barar ah ama kuusni  
kilin-kiladaada  
hoosteed ama meel  
ku wareegsan  
kalxanta.



## Isbeddelka caaradda naaska

Caarada naaska soo jiidantay,  
Qaabka oo bedelmay ama muujisa  
caalamado Dhacaan ka imanayo,  
dhiig bax, finan ama maqaar  
qolofaystay, dhilmay.



## Xeerka 5 qodob ah ee wacyi gelinta naaska

1. Ogow waxa caadiga kuu ah
2. Ogow waxa ay yihiin isbeddelada la raadiyo oo la dareemo
3. Eeg oo dareen
4. Si dag-dag ah ula socodsii dhaqtarkaaga wixi isbeddelo ah
5. Soo xadir baadhitaanka naaska laga bilaabo da'da 50

## Baadhitaaanka naaska

Haddii da'daadu ay tahay 50 iyo 70, waxaa lagugu marti qaadi baadhitaanka naaska 3 sano oo kasta sidii qayb ka mid ah barnaamijka baadhitaanka naaska ee Waqooyiga Ireland.

Magacaaga waxaa laga heli doonaa dhakhtarkaaga oo waxaa laguu soo diri doonaa martqaad si aad ugu timaado sawrika raajadda naaska ( Sawirka naaska).

Haddii aad ka da' wayntahay 70, si toos laguuguma marti qaadi doono. Si kastaba, weli waxaa kugu dhici kara kansarka naaska maxaayeelay khatartu waxay la korortaa da'da – Saddex meelood meel kanasarada naaska waxay ku dhacaan haweenka ka wayn 70. Sidaas awgeed waxaa lagugu dhiiri gelinayaan in aad samaysato ballankaaga baadhitaanka 3 sanadood oo kasta adoo la xidhiidhay xarunta baadhitaanka kuugu dhow (eeg bogga 10).

Wakhtiga xaadirka ah haweenka ka yar 50 laguma marti qaadayo baadhitaaka kansarka naaska maxaayeelay da'dan ka hooseeya:


- Halista Kansarka naasku way ka hoosaysaa;
- Haweenku guud ahaan waxay leeyihin nuddo ka cufnaan badan kaas oo ka dhiga sawiradooda naaska mid aad u adag in la akhriyo; iyo
- Caddayntu ma taageerto barnaamijka baadhitaanka dadwaynaha ee kansarka naaska ee haweenka ka dhalinta yar

Wuxu kugu dhici kara kansarka naaska wakhti kasta. Tan waxaa ka mid ah wakhtiga u dhexeeya ballamaha baadhitaanka naaska. Haddii aad ka walaacsantahay dhibaato naaska ah, ama aad leedahay taariikh qoys oo kansarka naaska ah, waa in aad la xidhiidhaa dhakhtarkaaga.

Wixii xog dheeraada ah fadlan booqo

[www.cancerscreening.hscni.net](http://www.cancerscreening.hscni.net)

**Halistaada kansarka naasku waysii korodhaa markaad sii waynaato.**



## Xarumaha Baadhitaanka

**Hay'ada Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshadda ee Belfast**  
(sidoo kale daboolaysa Hay'ada South Eastern  
HSC )

Xarunta Baadhitaanka  
12-22 Linenhall Street, Belfast BT2 8BS  
Telefoonka: 02890333700

**Hay'ada Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshadda ee Waqooyi**  
Baadhitaanka Naaska Qaybta waqooyi iyo Qaybta  
Qiimaynta  
Level A, Antrim Area Hospital 45  
Bush Road, Antrim BT41 2RL Tel: 028  
94424425

### **Hay'ada Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshadda ee koonfureed**

Qaybta baadhitaanka naaska  
Cusbitaalka Lurgan  
Sloan Street, Lurgan BT66 8NX Tel:  
028 38347083

**Hay'adda caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada Galbeed**  
Qaybta baadhitaanka naaska  
Ground Floor, The Nurses' Home  
Altnagelvin Area Hospital  
Glenshane Road, Londonderry BT47 6SB  
Tel efoonka : 02871611443





**Public Health Agency**

12–22 Linenhall Street  
Belfast  
BT2 8BS  
Tel: 028 9032 1313  
[www.publichealth.hscni.net](http://www.publichealth.hscni.net)  
[www.cancerscreening.hscni.net](http://www.cancerscreening.hscni.net)